

Haddii aad

La Jiran Tahay Furuqa Daanyeerka (Mpox)

Mpox wuxuu ku faafaa isku dhawaanshaha, istaabashada maqaarka, ayna ku jiraan istaabashada jireed ee galmada (sida shumiska, dhabaan-dhabka, ama falka galmada), iyo taabashada walxaha/dharka taabtay nabarada caabuqa, boogaha, ama dheecaanka jirka. Haddii aad la xanuunsan tahay mpox, raac tilmaamaha hoose oo booqo www.SanDiegoCounty.gov/monkeypoxSD si aad u hesho xogaha soo kordha iyo tilmaan.



Iskeli-yeel

- Isku gooniyeel (joog) guriga oo la soco aastaamaha. Xanuunka ayaa caadiyan socda 2-4 asbuuc.
- Iska ilaali inaad la wadaagto agabka guriga iyo taabashada xayawaannada si aad uga hortagto in caabuqu ku faafdo xayawaanka rabaayada ah.
- Xiro maaskaro nabarada furuqana waa in sidoo kale si fiican loo daboolaa ilaa ay si buuxda uga bogsoonayaan.



Xiriirka

- La xiriir dhakhtarkaaga si lagu baaro, haddii loo baahdo.
- Wac 2-1-1 ama 7-1-1* (naafada maqalka), haddii aadan haysan dhakhtar ama xog dheeraad ah.

*Wac 7-1-1 haddii aad qabto naafada maqalka oo codso in lagugu xiro 2-1-1 oo laga helaayo (858) 300-1211.



Qaado Daawada

- Inta badan dadka ayaa a bogsooda mpox ayagoo aan u baahan wax daawooyin ah ama daawayn kale.
- Hase yeeshee, Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) ee Maraykanka ayaa ogolaaday in daawada Tecovirimat (TPOXX ama ST-246) lagu daweeyo mpox, waxaana laga heli karaa rugaha caafimaadka.



Wargelin sii Dadka Kula Joogay

- U sheeg lamaaneyaasha iyo dadka kula joogay inaad qabto astaamaha xanuunka.
- Booqo www.TellYourPartner.org si aad u dirto ogeysiiska lamaanaha oo qarsoodi ah.

